



JAMHUURIYADDA FEDERALKA SOOMAALIYA
MAAMULKA GOBOLKA BANAADIR
DOWLADDA HOOSE EE XAMAR

WAR SAXAAFADEED:

Muqdisho ,13 April 2020

Xafiiska Gudoomiyaha Gobolka Banaadir ahna Duqa Magaalada Muqdisho

Mudane. Cumar Maxamuud Maxamad

Maamulka Gobolka Banaadir wuxuu gobolka u dejinayaa qorshe maxalli ah oo lagaga hortegayo cudurka COVID-19.

Maamulka Gobolka Banaadir wuxuu ka diyaar garoobayaa cudurka Covid19 ee la saadaalinayo in uu Soomaaliya ka dillaaci doono bartamaha Abriil ilaa May 2020. Maamulka Gobolku wuxuu asaasay Guddi-hawleedka COVID-19 wuxuuna dejiyay qorshe kor loogu qaadayo maaraynta caafimaadka guud, diyaargarawga iyo ka-jawaabidda caabuqa.

Qorshahani waxa uu kaabayaa Qorshaha 5-ta Sano ee Maamulka Gobolka ee hore u sii jiray, wuxuuna mudnaanta siinayaa kooxaha nugal ee looga shakiyi karo qaybna ka qaadan kara faafista caabuqa haddii aan si ku filan loo tixgelin, gaar ahaan dadka gudaha ku barakacsan iyo saboolka magaalada.

Qorshaha ka falcelinta ee Maamulka Gobolku waxa uu la jaanqaadayaa hagayaasha Ha'yadda Caafimaadka Adduunka, Qorshaha Ka Jawaabidda ee Gargaarka Bini-aadamtinnimo ee caalamiga ah, iyo Hagaha COVID-19 ee Go'aan-gaarayaasha Maxalliga ah.

Waqtigana, iyadoo laga xaqiijiyay 25 xaaladood oo keliya, Soomaaliya waxay weli ka mid tahay dalalka 'aanu xanuunku aafayn.' Mudnaanta kowaadi waa yaraynta iyo joojinta gudbidda, ka hortagga in uu dillaaco, iyo dib-u-dhigista faafiddiisa. Sidaa darteed, hadafyadan ayaa la hiigsanayaa:

1. In la hawlgeliyo Xarunta Hawlgalka Degdegga ah, lana sameeyo qaabdhismeed lagu maareeyo xaaladda bulshada oo dhan;
2. In la fahmo oo lala socda sida uu xanuunku bulshada ugu dhex faafayo;
3. In la yareeyo oo hoos loo dhigo gudbidda;
4. In xoogga la saaro dadka aadka ugu nugal;
5. In la xoojiyo oo la ballaariyo awoodda nidaamka caafimaad si loo joojteeyo hawlgallada daryeelka caafimaad loogana baaqsado dhimasho badan;
6. In la ballaariyo isla socodsiinta halista oo bulshadana la abaabulo; iyo
7. In la yareeyo saamaynta dhaqaale iyo midda bulsheed ee ay ka tegi karto aafadan caalamiga ah.

Qorshaha Falcelinta ee Maamulka Gobolka waxa ka mid ah hawlqabadyo bar-abbaar leh oo cadcad oo qorshuhu socodsiinayo. Tusaale ahaan, maaddaama in ka badan 30% bulshada magaaladu aanay helin biyo ku filan, oo ah il muhiim u ah in laga faa'idaysto si looga hortago faafidda caabuqa, Maamulka Gobolku wuxuu qorshaynayaa in uu taageero in 3 000 oo xarumo fayadhawr oo dheeri ah loo dhiso dadka nugal ee xarumaha barakacayaasha gudaha iyo gobolkaba.

Caqabadaha ugu waaweyni waa maqnaanshiyaha macluumaad la isku hallayn karo. Waa daruuri lama-huraan ah in si dhab ah loo fahmo faafidda cudurka. Waxa muhiimadda ugu sarraysa leh nidaamyada diwaangelineed ee ay tahay in si degdeg ah loo rakibo si ay ula socdaan xaaladaha iyo darnaanta xaaladaha. Qorshayaasha Maamulka Gobolku waxay wax ka tarayaan ururinta, habaynta iyo wadaajinta xogta khusaysa.

Waa in wax lagu darsado wardoonka, raadinta joogtada ah ee xaaladaha, la-socoshada, iyo baarista digniinaha iyadoo lala kaashanayo Wasaaradda Caafimaadka, Hay'adda Caafimaadka Adduunka iyo saaxiibbada, iyadoo lagu darayo meelaha laga soo galo iyo goobaha qaxootiga.

Si loo sugo nidaamka daryeelka caafimaad loona keeno kartida iyo awoodda ay Muqdisho u baahan tahay, qorshaha waxa uu mudnaanta siinayaa in hawlwadeenno caafimaad loo daabbulo aagagga oo dhan iyo in hawlwadeennada caafimaad ee heer degmo lagu tababbaro aqoonsashada xaaladda iyo aqoonsashada cudurka iyo maarayntiisa, in guriga lagu daryeelo xaaladaha fudfudud, iyo cayimidda xarumaha heerka labaad ee loo soo gudbinayo. Waxa sidoo kale xilkasnimo ah "in ka kordhiyo suuragalnimada is-karantiilidda, karantiilka, iyo kala-durkidda, helid aad ah iyo in la baahiyo hoyga, oo lagu laro faahfaahinta sababhooda."

Maamulka Gobolku wuxuu qorshaynayaa in uu madal elegtaroonig ah isugu wada yeero wakiillada dawladda hoose, waaxaha gaarka loo leeyahay, iyo saaxiibbada caalamiga ah, si ay internetka uga wada hadlaan bulshada rayidka ah oo ay u hawlgeliyaan istaraatajijyadda maxalliga ah isna dhaafsadaan waaya-aragnimada iyo jawaabta uga qorshaysan aafada COVID-19.

-DHAMMAAD-

Wixii faahfaahin dheeri ah kala xiriir:

Dr. Hodan Cabdullahi Cali
Isudduwaha Heer Gobol ee Arrimaha Bini-aadamtinnimada iyo Xalalka Waara
Maamulka Gobolka Banaadir
Email: Hodan@bra.gov.so